



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School


Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.excalibur.org.uk


Talaada 16^{da} Juun 2026

Gacaliyaaal Qoysas,

Aad ayaad ugu mahadsantihin caawinaaddiinna xilliga – durbaba xilligu wuxuu ahaa mid mashquul ah sida kaamka fasallada 3 /4 oo ay la socdaan nashaadaad kala duwan ee dhireyn leh, fasalka 1 wuxuu ahaa mid ku wanaagsan imtixaankooda dhawaqa, Fasalka 4 iyagana waqti wanaagsan ayey u ahayd imtixankoodii isku-dhufashada, qaar ka mid ah ardayda Fasalka 6 waxay Cabot ku mataleen bandhigga fiyaliinka oo ka dhacday Bristol Beacon.



Waxaa kaloo mahadsan dhamaan qoysaskii ka soo qeyb galay subaxa qaxwada ee Dhisidda Bulshadeenna oo ay daadihineysay Marcia, kulammadaan waxaa la qaban doonaa usbuucyada soo socda maalinta Isniinta subixii.



Ugu dambeyn, waxaa mahadsan dadkii ka qeyb galay Conversation Cafes – kuwaasoo koox u ah qoysaska ka soo qeyb galay kuna hadlaayey luqadda guriga si ay xiriir u sameeyaan, isla markaana la wadaageen sheekooyinka dhaqanka caruurta. Waxaan dooneynaa in in aan dhisno bulshadeenna Cabot una dabbaaldegnoo kala duwanaanshaheenna si aan wax badan uga ogaanno qofka kale.

Fadlan warsidaha ka fiiri fasallada ay macallimiinta ka howl geli doonaan sannadka dambe. Si aad ah ayaan uga fakernay si macallimiinta awooddooda ay ula falgasho fasalka. Waxaad arki doontaan in Miss Drayton ay ka soo noqon doonto shaqadeedii Compass Point iyo in Miss Fletcher aan lagu darin liiska – iyadu waa ay ka guureysaa Bristol marka ma awooddo in ay nala sii shaqeyso. Waxaan u rajeyneynaa guul waxaannan dhaheynaa mahadsanid sidii ay noola shaqeysay. Waxaan hadda ku mashquulsannahay shaqaaleynta macallin fasalka 2 waana idinla soo socodsiin doonnaa wixii khbaar ah. Weli waxaa tixgelineynaa meeleynta shaqaalaha kaaliyayaasha ee sannadka dambe si loo hubiyo in xirfaddooda ay la mid noqoto baahida fasalka. Waan idiinla soo socodsiin doonnaa meesha lagu meeleeyn doono.

Taariikhaha Xusuus-Qorka

- 28^{da} Juun Munaasibad Bulsho
- U/b 29^{ka} Juun – Usbuuca ka-hor-tagga midab-faquuqa
- 17^{da} Juulaay – Warbixinnada ayaa la soo dhiibi doonaa
- 20^{ka} Juulaay – bandhigga fasalka 6
- 22^{da} Juulaay – maalinta ugu dambaysa xilliga



Attendance

celceliska imaanshaha dugsiga usbuucii hore wuxuu ahaa **94%** kaasoo u dhaw **Yoolkeenna 96%**. Aad ayaad ugu mahadsan tihin taageeradiinna. Hambalyo fasalka **2** kaasoo keenyo imaansho **98%** usbuucii hore.


Waxaan ognahay in filashada Dowladda iyo Cabotay yihiin in carruurta dugsiga yimaadaan maalin walba marka laga reebo marka ay aad u xanuusan yihiin.

Haddii canuggaada uu buko uuna dugsiga imaan karin, fadlan xafiiska dugsiga kala soo xiriir 01173772630 si aad noogu sheegto. Waxaa laga yaabaa in aan guriga kugu soo booqanno haddii aan war kaa helin waxaana laga yaabaa in aan sameyno booqasho bad-qab hubin haddii uu canuggaada maalmo badan xanuunsan yahay.

Fasaxyada waa in tikidka la goostaa waqtiga uu dugsi fasax yahay, ganaax ayey kuu soo diri kartaa Xukuumadda Deegaanka haddii canuggaada uu dugsiga imaaneynin. Ma dooneyno in mid ka mid ah caruurta uu seego xaqooda.



Waxaan fileynaa in carruurta oo dhan ay dugsiga yimaadaan diyaarna u ahaadaan gelidda fasallada saacadda 8:45 si ay u seegin waxbarashadooda. Xataa seegitaanka 5 daqiiqo maalin walba waxay sannadkii u dhigantaa ka badan 3 maalmood. Waad ku mahadsan tihin taageeradiinna.



Risebshanka: Ms Codling iyo Miss McDonald
 Y1: Miss Redfern
 Y2: Recruiting
 Y3: Miss Flowerdew
 Y4: Miss Drayton
 Y5: Miss Knott
 Y6: Mr Hoddinott
 Miss Davies waxay sii ahaaneysaa Hogaamiyaha Akhrinta iyo PSHE, waxayna dabooli doontaa qaar waqtiga PPA.
 Miss Pimenta waxay sii wadi doontaa in ay dabooшо PPA.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumbo warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630

Cusbooneysiinta sanadka dambe

Miisaaniyadaha dugsiyada waxay sanadka kasta sii adkaanayaan waxaan doonaynaa inaan la wadaagno sida qaar ka mid ah arrimahan ay hadda noogu saameyn karaan, iyo sidoo kale qaar ka mid ah beddelka suurtagalka ah.



Sports

Waxaa laga yaabaa inaad ku aragtay wararka in miisaaniyadda Sports Premium la dhimayo ilaa qiyaastii laba meelood saddex meelood, laakiin iyadoo lacag kale la filayo in la helo dabadeed sanadka si loo taageero. Hadda, taasi waxay ka dhigan tahay inaan yeelan doono macallimiin waqtiga qadada iyo naadiyada kadib iskuulka maadaama aan mudnaanta siinayno bixinta manhajka PE. Naadiyadii hore lacag la'aanta ahaa, waxay yeelan doonaan kharash yar si loo hubiyo in aan u socodsiin karno carruurta. Ma qaadi doonno lacagta buuxda laakiin waxay noqon doontaa wax yar oo gacan ka geysanaya.



Police

Waxaa nala sameeyey xiriir wanaagsan oo aan la leenahay PCSO-ga maxalliga ah, Frankie Patrick, waxaana uu bilaabi doonaa inuu yimaado hal qadada usbuucii bisha Sebtembar si uu qadada ula yeesho carruurta, uga qaybqaato ciyaaro qaar ay ku jiraan garoonka ciyaarta, isla markaana uu jaangooyo.



Docklands, koox dhalinyaro maxalli ah, sidoo kale waxay diri doonaan shaqaale qaar xilliyada qadada qayb ka ah hawlgalladooda bulsho oo ay Dowladda maalgeliso. Waxaan rajeyneynaa inay keenaan dhaqdhaqaaqyo kala duwan oo ay carruurta ku hawlgeliyaan xilligan. Fadlan eeg website-kooda ee ku saabsan hawlaha banaanka ee iskuulka ee ay heli karaan. <https://fullcircleproject.org.uk/>



Parent



Teacher



Association

Waxaan sii wadi doonaa ururinta lacagaha waxaana had iyo jeer ku faraxsanahay taageeradaada arrintan. Waxaan rajeyneynaa inaan abaabulno PTA rasmi ah (Ururka Waalidka iyo Macallinka) waxaana jira koox waalidiin ah oo hadda eegaya taariikhaha kulanka guud ee sannadlaha ah (AGM). Warbixin dheeraad ah waa la soo socodsiin doonaa.

Shaqo guriga



Homework

Kaliya xasuusin ah in ardayda Reception, Y1 iyo Y2, aanan u qorayn shaqo guriga oo qoraal ah – waxaan filaynaa in carruurta ay si joogto ah u akhriyaan maadaama akhrisku yahay xirfad muhiim ah oo xaqiijineysa inay heli karaan manhajka oo dhameystiran marka ay kori doonaan sidoo kale akhriskuna waa wax fiican oo caafimaadka maskaxda ah. Carruurta da'dan waxa ay wax badan ku bartaan ciyaarista markaa waxaan kugu dhiirrigelinaynaa inaad ciyaarto adiga iyo ilmahaaga si aad u dhisto eraybixintiisa iyo xakamaynta dareenka. Carruurta Y3, Y4, Y5 iyo Y6 waa inay si joogto ah u akhriyaan, waxayna galaan Times Table Rockstars si ay u xoojiyaan xisaabta isku dhufashada, waxaana la siiya shaqo guriga oo qoraal ah maalinta Jimcaha. Haddii ilmahaagu uusan guriga kusoo wadin buug akhris cusub maalinta Jimcaha ama shaqo guriga, fadlan la xiriir macallinka fasalka.

Badbaadada Internetka



Online Safety

Xasuusin ah in ay muhiim tahay inaad ogaato waxa ilmahaagu ka galayo internet-ka. Qoysas badan ayaa nagu soo xiray dhawaan iyaga oo ka hadlayay ilmahooda oo YouTube galayo. Waxaan jeclaan lahayn inaan idin ogeysiino YouTube Kids, wali waxaa jira khataro qaar – fadlan eeg boodhka ku lifaaqan laakiin waxa ku jira waxaa u badan inay ku habboon yihiin carruurta.

Dhacdo Bulsho



Community



Event

28-ka Juun, waxaan qaban doonaa Dhacdada Bulshadeena – tan waxay guul weyn ahayd sanadkii hore waxaana rabnaa inaan u mahadcelinno qof kasta oo hadda si dadaal leh ugu shaqaynaya abaabulka dhacdadan sanadkan. Waxaan rajaynaynaa in la helo meelo ganacsi oo lacag ururin u sameeya iskuulka, meelo soo bandhigaya dalabyo iyo hawlo maxalli ah, iyo sidoo kale rinjiyeynta wajiga iyo hawlihii kale ee sanadkii hore la qabtay. Waxaan rajaynaynaa inaan halkaas idin aragno.